



Xeer Madaxweyne Lr: 004/02/2018

Tr: 13th Feb 2018

Joojinta Dhul-bixinta Degmada Hobyo

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug:

Markuu Arkay: Qodobka 50aad, faqradiisa 10aad ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Galmudug;

Markuu Tixgeliyay: Hormarinta iyo tayeynta degmada Hobyo;

Markuu Garwaaqsaday: Muhiimadda ay leedahay sixidda hanaanka dowladnimo iyo bixinta hantida dowladda;

Wuxuu Joojiyey Illaa Amar Dambe:

1. Dhammaan bixinta ama iibinta dhulalka aan lahayn wax sharci ah ee Degmada Hobyo.
2. Waxaa la farayaa Gudoomiyaha Degmada in aan la'iibin Karin dhul aan sharci lahayn ee hoos yimaada Degmada Hobyo.
3. Waxaa lagu wargalinayaa qof kasta oo hanti galiya dhul aan sharci lahayn in wixii ka yimaada uu isagu masuuliyaddeeda qaadi doonto.
4. Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

Mudane Axmed Ducaale Geelle

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug

